Warqada Heshiiska
Heshiska gorgortanka wadareed ee Hadda
Muddada Sebteembar 1, 2021 illaa Ogosto 31, 2024
Una dhaxaya Ururka Macalimiinta Boston, Local 66, AFT-Massachusetts
iyo Guddiga Dugsiga ee Magaalada Boston

Qoraalka Heshiiska ("MOA") wuxuu u dhexeeyaa Midawga Macalimiinta Boston, Local 66, AFT-Massachusetts ("BTU" ama "Midawga") iyo Guddiga Dugsiga ee Magaalada Boston ("Guddiga"), si wadajir ah, " Dhinacyada" oo ka kooban shuruudaha heshiiska gorgortanka wadareed ee hadda.

Gaar ahaan, Luuliyo 13, 2022, dhinacyadu waxay gaareen heshiis hordhac ah ee ansixinta xubinimada BTU iyo ogolaansha Gudigu. Heshiiskani wuxuu daboolaysaa muddada saddexda (3) sano ee Sebteembar 1, 2021 illaa Ogosto 31, 2024. Waxyaabaha soo socda waa isbeddelada heshiiska ee ku taariikhaysan Sebteembar 1, 2018 ilaa Ogosto 31, 2021. Marka laga reebo sida hoos loogu qeexay si cad, dhinacyadu waxay ku heshiiyeen in shuruudaha iyo qodobbada heshiiska 2018-2021 mudada loo kordhiyo iyada oo aan wax laga beddelin muddada Sebteember 1, 2021 illaa Ogosto 31, 2024.

1. Maalamaha fasaxa (dhaqan galaysa 9/1/22)

1. Ku samaynta dib u eegis Qodobka V E. 3 ee qandaraaska macalinka adiga oo ku daraya fasaxa Juneteenth liiska fasaxyada oo maalinta Columbus u bedelo maalinta dadka dhaladka ah.
2. Dib u eeg heshiiska Takhasuslaha ee ABA in lagu daro fasaxa Juneteenth oo aad qor isla fasaxyada heshiiska macalinka.
3. Dib u eegid Qodobka III C ee heshiiska xirfadlayaasha si loogu daro isla liiska fasaxyada qandaraaska macalimiinta.
4. Ku dar Qodobka III C ee cusub qandaraaska beddelka oo u gudbi qaybaha xiga:
   C. Maalamaha fasaxa iyo Nasashada
   Qeybaha/dhismaha beddelka waxa la bixinayaa todobaadka fasaxyada iyo nasashada dugsiga. Liis ku tax isla fasaxyada qandaraasyada kale.

2. Fasaxyada Diimeed (dhaqan galaysa 9/1/22)

Ku badal Qodobka VIII ee sii jiray Q. 5 (d) "Fasaxyada Diinta" waxyaabaha soo socda:

Fasaxyada Diimeed:

Gudigu waa inuu siiyaa shaqaalaha raacsan ciidaha diiniga ah ee dhaca marka dugsiyadu furmaan laba (2) maalmood iyadoon wax mushahar ah laga jarin ama fasax shakhsiyeed. Xafiiska Sinaanta ayaa hayn doona liiska ciidaha diinta ee si toos ah loo ogolaaday. Codsiyada ku saabsan ciidaha diimeedka kale waxa laga yaabaa in loo gudbiyo Xafiiska Sinaanta.

Shaqaalaha doonaya inay fasax qaataan sida waafaqsan xeerkan qandaraaska waa inay ogeysiiyaan kormeerahooda iyo Xafiiska Sinaanta inay aqoonsadaan xus diimeedka ugu yaraan toban maalmood oo dugsi ka hor. Haddii nooca xus diimeedka ay tahay inaan taariikhda saxda ah la ogeyn toban maalmood oo dugsi kahor, shaqaaluhu waa inuu bixiyaa ogeysiis taariikhda ku dhow. Haddii fasaxu u kusoo hagaago tobanka maalmood ee ugu horreeya sannad-dugsiyeedka, shaqaaluhu waa inuu ogeysiiyaa maalinta ka horreysa maalinta ugu horreysa ee dugsiga ee ardayda.

FIIRO GAAR AH: Kuwa kore waxa sidoo kale la gelin doona wada-xaajoodka kale ee cutubyada ‘ qandaraaska.

*Sidoo kale, kani maaha luqad lagu dari doono heshiiska laakiin liiska ciidaha diimeedka ee si toos ah loo ogolaaday waxaa ku jira laakiin aan ku xaddidnayn: Rosh Hashanah, Yom Kippur, Eid al Fitr, Eid al Adha, Orthodox Good Friday, Lunar New Year, Three Kings Day, Diwali***.**

3. Shahaada Sharciga ee Heerka Jaamacadeed

Ku samaynta dib u eegis faqradaha labaad iyo saddexaad ee Qodobka VIII D. 5(c) sida soo socota.

Tirtir faqradaha soo socda:

Dhibcaha ama shahaadooyinka aqoonta sharciga waa in lagu abaalmariyo shaqaalaha soo dhigtay dugsiga sharciga markay ahayd ama kahor taariikhda ansixinta Heshiiskii 1983-86 ee helay shahaadadooda sharciga uun 30, 1985 ama kahor. Shaqaalaha kale ee haysta shahaado jaamacadeed sharciga ayaa markasta miisaanka mushaharka lagu dari doona kuwa mashaharkooda la kordhiyay halka ay sidooda hore ka ahaan lahayd. Codsiga ogolaanshaha hordhaca ah ee koorsooyin kasta waa inuu ka jawaab celiyaa Waaxda Shaqaalaynta sida ugu dhakhsiyaha badan.

Juris Doctorate: BPS waxay ogolaatay inay xaqiijsio tirada macalimiinta hadda ee JD si loo ogaado habka ugu haboon ee lagu magdhabayo waxbaristooda.

oo gali jumlooyinka soo socda:

"Dhaqan galaysa laga bilaabo 9/1/2022, shaqaalaha haysta shahaadada jaamacadeed JD (Juris Doctorate) waa in lagu meeleeyaa heerka diktoornimada."

4. WiFi

Gali Qododka cusub VII A. 22 cinwaankiisu yahay “Wi-Fi”:

“DHaqangalaysa 9/1/22, Macalimiinta loogama baahna inay u isticmaalaan goobahooda gaarka ah ee Wi-Fi marka ay ka shaqaynayaan banaanaka ama gudaha dhismaha/barnaamijka BPS.”

FIIRO GAAR AH: Ku dar isku luqad dhammaan 4 heshiis

5. **Saxanada Faraha lagu dhaqdo ee ku Yaala Xaafiisyada Kalkaalisooyinka Caafimaadka**

Geli jumladan cusub ee soo socda Qodobka VII A. 2 (b):

“Xafiis/dhisme kasta oo caafimaad ahaaneed waxaa lagu dhajin saxanka fara dhaqashada oo shaqaynaya.”

6. **Kordhi Heerka Daboolista Xirfadlayaasha**
Wax ka beddel Qodobka V A 8(c) ee qandaraaska qeybta macalinka iyo Qodobka II A. 6. (b) ee qandaraaska xirfadlayaasha si, oo dhaqan galaya laga bilaabo 9/1/22, heerka daboolista Xirfadlayaasha inuu lagu kordhiyo ilaa $13 saacaddii dhammaan Xirfadlayaasha ka shaqaynaya fasalka marka uu Macallinku maqan yahay. Dhaqan kasta oo hore oo ah in xirfadlayaasha laga saaro daboolida Qodobkan, oo ay ku jiraan gaar ahaan xirfadlayaasha maktabadda, waa laga laabtay.

7. **Barnaamijka Hoy La'aanta**
Ugu dar qayb-hoosaad cusub ee d Qodobka III H 1 sida soo socota: Magaalada Boston waxay soo bandhigtay awoodeeda inay wax ka qabato hoy la'aanta shakhsiyaadka iyadoo diiradda saaraysa arinta oo isu keenaysa dadka dhismayaasha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Magaalada Boston iyo BPS waxay iska kaashanayaan barnaamij tijaabo ah oo lagu guriyaynayo1,000 qoy oo hoy la'aan ah oo caruurtooda yihiin arday dugsiyada Boston iyagoo wata qorshayaal kor loogu qaadayo dhamaadka wakhtiga tijaabada si loo dejiyo qoysaska ilaa 4,000 arday hoylaawayaal ah. Waxaan la shaqayn doonaa si wada jir ah kuwa iska kaashanaya barnaamijak tijaabada oo ay ujeedadiis u tahay cirib tirka hoy la'aanta qoysaska ardayda dugsiyada Boston shan sano gudahood.

8. **Adeega Darajaynta Xirfadlayaasha**
Xirfadlayaasha ka soo shaqeeyay jagooyinka kale ee BPS waa in lagu xisaabiyo dhammaan sanadaha adeegga marka ay bilaabaan shaqada xirfadle ahaan, sida soo socota:

Geli Qodobka cusub III A ee heshiiska xirfadlayaasha sida soo socota (oo u gudbi qaybaha dambe):

A. Meelaynta iyo Dalacsiinta Tartiib-taartiibta ah

1. Heerka Shaqaalaynta

Laga bilaabo Sebtembar 1, 2022, xirfadlayaasha cusub ee la shaqaaleysiiyay waa inay ka soo shaqeeyeeb dhammaan sanadaha shaqadooda BPS jago kasta, oo lagu tiriyaa sannadaha waayo-aragnimadooda ujeeddooyinka go'aaminta heerka shaqaalaysiinta. Gaar ahaan, xubnaha qaybta heshiiska Xirfadlayaasha waxay heli doonaan hal mar mushaharkooda la bixiyo sannad kasta oo laga shaqeeyo Dugsiyada Dadweynaha Boston, iyada oo aan loo eegin jagada la hayo.

2. Shaqaalaynta Khibrad ahaaneed ee Boston

Intaa waxaa dheer, laga bilaabo Sebteembar 1, 2022, dhammaan xirfadlayaasha ay shaqaaleysiisay BPS, xitaa haddii aysan ahayn shaqaale cusub, waxaa loo wareejin doonaa heerka qandaraaska ee khibraddooda; si kastaba ha ahaatee, in tallaabadan oo kale aysan keenin in la dhimo mushaharka ama gunooyinka ama laga joojinayo xirfadle kasta oo mushahar ama guno kordhin haddii kale lagu bixiyo shuruudaha qandaraaska ama sida ay bixiyaan guddiga dugsiga.

3. Tirsashada Sanad

Ujeedooyinka Qodobka III A. 1. iyo 2., boqol iyo labaatan (120) maalmood sannad dugsiyeed kasta waa in loo xisaabiyaa hal sano oo waayo-aragnimo shaqo ah.

9. **Kordhinta Mushaharka LATF**

(Aad 14 ee bogga 108) U kordhinta mushaharka LATF ilaa $1,000 25 ardayba oo dhaqangalaysa laga bilaabo 9/1/22, oo ku tusmaysan sanadka soo socda. Jadwalka wuxuu noqon doona sida soo socota:

9/1/21	9/1/22	9/1/23
$315.18	$1,000.00	$1,030.00

10. **Adeega Darajaynta**

Dib u eegis ugu samee jumlada koobaad ee Qodobka VIII A. 3. (b) sida socota:

"Laga bilaabo 9/1/22, macalimiinta ku meel gaarka ah waxaa la siin mushaharkooda ilaa saddex (3) sano hal mar oo buuxa oo waayo-aragnimo waxbarid ah oo lagu qanco oo ka baxsan nidaamka dugsiga, iyo dhammaan sannadaha buuxa ee waayo-aragnimada gudaha Dugsiyada Dadweynaha Boston."

11. **Laabtoobyada loogu talagalay Waxbarashada**

Geli Qodobka III M ee soo socda ee cusub qandaraaska ABA oo dib u qor qaybta xigta:
M. Laabtoobyada loogu talagalay Waxbarashada
Marka laabtoobyada la helo, Khabiirada ABA waa inay lahaadaan ikhtiyaarka ah inay uga qaybgalaan barnaamijka Laabtoobyada loogu talagalay Waxbarashada sida macalimiintu ay rabaan.

Geli Qodobka III F ee soo socda ee cusub qandaraaska beddelka oo dib u qor qaybta xigta:
F. Laabtoobyada loogu talagalay Waxbarashada
Marka laabtoobyada la helo, Qeybta/Dhismaha beddelka ah waa inay lahaadaan ikhtiyaarka ah inay uga qaybgalaan barnaamijka Laabtoobyada loogu talagalay Waxbarashadasi sida macalimiintu ay rabaan.

Geli Qodobkan cusub ee III O qandaraaska xirfadlayaasha, oo dib u qor qaybta xigta:
O. Laabtoobyada loogu talagalay Waxbarashada
Marka laabtoobyada la helo, xubnaha soo socda ee qaybta gorgortanka xirfadlayaasha waa inay lahaadaan ikhtiyaarka ah inay uga qaybgalaan barnaamijka Laabtoobyada loogu talagalay Waxbarashadasi sida macalimiinta door bidaan:

1. Xariiriyasha Qoyska
2. Isuduwaha Qeybaha Bulshada
3. Turjubaanka Luqada Dhagoolaha
4. Xirfadlayaasha ABA Strand
5. Qoraalka indhoolyaasha iyo Agabka Khabiirka Xirfadlayaasha
6. Xirfadlayaasha Maktabada
7. Kuwo kale ee muhiimka ah oo ay awoodu u ogolaato, ilaa 25% ee qaybta gorgortanka xirfadlayaasha.

12. **Xariiriyasha Qoyska**

Isugu dhafka Xiriiriyaha Qoyska ee heshiiska sida soo socota:

1) Qodobka I A. –

Ku dar ereyga "Xiriirka Qoyska" farqada koobaad inta u dhexeysa "isku-duwayaasha bulshada" iyo "turjumaanada luqada dhagoolaha". [Bogga 128]

2) Qodobka II A. 1. –

Ku dar luqadda dhamaadka faqrada:

"Shaqada xubnaha qaybta xirfadlayaasha ee u shaqeeya sidii Xiriirinta Qoyska waa inay horumariyaan ka qaybgalinta qoyska iyo ardayda gudaha dugsiga, BPS, iyo bulsho weynta Boston." [Bogga 131]

3) Qodobka II , A. 6. –

Ku dar kuwa soo socda:

"(d) Laga bilaabo 9/1/22, Lama waydiin karo Xiriirinta Qoyska ama laguma xiri karo inuu u shaqeeyo isagoo ah bedelka macalinka maqan." [Bogga 132]

4) Qodobka II. B. 3. –

Ku dar “Xiriieiyaasha Qoyska” lambarka 16. [Bogga 135]

5) Qodobka II. B. 5. –

Ku dar "Xiriiriyaha Qoyska" faqrada saddexaad u dhexeysa "Iskuduwaha Bulshada" iyo "Xirfadlayda La kulanta Ardayda". [Bogga 136]

6) Qodobka II. B. 6. –

ku dar “ . Kooxda 5: Xariiriyaha Qoyska (Qeybta Jagada 16) kadib “ . Kooxda 4: Turjubaanada Luqada Dhagoolaha (Qeybta Jagada 15)”. [Bogga 136]

7) Qodobka C. 1. –

ku dar “ 6. Xiriiriyaha Qoyska” dhamaadka liiska jagooyinka. [Bogga 137]

8) Laga bilaabo 9/1/22, Dib u eegis ku samee Qodobka III E. ee qandaraaska xirfadlayaasha, si loogu daro "Xiriiriyayaasha Qoyska" qaybta saddexaad ee heerka mushaharka, si loogu akhriyo "Iskuduwaha Bulshada, Xirfadlaha Caafimaadka, iyo Heerka Xiriirka Qoyska"

9) Ku dar qodob cusub II E., oo cinwaankeedu yahay “Xiriiriyaha QOyska”:

1. Saacadaha shaqada

Saacadaha maalinlaha shaqada ee Xiriiriyaha Qoyska waa inay ahaataa siddeed (8) saacadood maalintii.

2. Mudada Shaqada ee sanadka

Laga bilaabo 9/1/22, mudada shaqada sanadka ee Xiriiryaha Qoyska waa 215 maalmood. Mudada shaqada ee Sanadka waa inay ku jiraan 180 maalmood ee ardaydu dugsiga ku

jiraan ("sanad dugsiyeedka"), iyo 35 maalmood oo ka baxsan sanad dugsiyeedka. Labada toddobaad ugu dambeeya ee bisha Luulyo waa in lagu daraa dhammaan maalmo uusan shaqaynayn Xiriirrada Qoyska. 35 maalmood ee ka baxsan sanad dugsiyeedka waxa loo mudeeyay si wada jir ah shaqaalaha iyo maamulahooda/madaxa dugsigooda.

13. **Waxbarashada Gaarka ah**

Balanqaadka U dhanaanshaha Waxbarashada

Tirtir Qaybta 2 ee Qodobka V A kuna badal kuwan soo socda:

Himilada

U dhanaanshaha waxaa si buuxda loo bixiyaa marka dhammaan ardayda wax loogu baro jawiga ugu xaddidan oo la siiyo helitaan joogto ah adeegyo ah buuxiya baahiyahooda shakhsi ahaaneed iyo kuwa gaarka ah. U dhanaanshaha maaha goob ama barnaamij. Dhammaan fasallada Dugsiyada Dadweynaha Boston waa inay noqdaan kuwo loo dhan yahay.

Dhaqamada u dhanaanshaha waxa loola jeedaa istiraatijiyadaha waxbarida iyo hab-dhaqanka ee hormarinta natiijooyinka tacliimeed iyo bulsho ito shucuureed dhammaan ardayda naafada ah iyo ahaynba, goobaha waxbarashada guud. Dhinacyada waxay balan qaadeen inay kordhiyaan dhaqamada u dhanaanshaha iyo fursadaha dhamaan ardayda iyadoon loo eegin heerka baahidooda.

Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada qaba (IDEA) wuxuu u baahan yahay in ardayda naafada ah lagu baro jawi dagan oo si gaar ah loo habeeyay, taageerooyinka ku habboon ee lagama maarmaanka loo fidiyo u ah hirgelinta IEP oo ay horumar wax ku ool ah ka gaaraan yoolalkooda IEP, marka la eego duruufahooda. Waxaan aaminsanahay in dhamaan ardaydu ay buuxsamaan oo la aqbalo xubnaha bulshada dugsiga iyo ardayda naafada ah meelaynta waa in ay marka hore tixgeliyaan xaqa ay u leeyihiin in wax lagu baro goobta waxbarashada guud iyada oo ay weheliso asaagooda soo koraya ee caadiga ah. Waxbarasho loo wada dhan yahay oo waxtar leh waxay u baahan tahay wadashaqayn heerkeedu sareeyo oo dhexmarta waxbarashada guud, waxbarashada gaarka ah, adeeg bixiyayaasha la xidhiidha iyo shaqaalaha taageerada si loo hirgeliyo oo loogu daydo bulsho loo wada dhan yahay.

Arday kasta oo dhigta BPS waa arday dhigta waxbarasho guud marka hore. Waxaan sidoo kale wadaagnaa caqiidada guud oo ah in guusha iyo fursadaha ardaydeenu ay tahay mas'uuliyadeena si wadajir ah. Waxaan sidoo kale ogolaanay inaan raaci doono dhamaan shuruucda federaalka iyo gobolka, xeerarka, iyo habraaca la xiriira waxbarashada gaarka ah.

U Gudbitaan Degmo loo Wada dhan yahay
Dhammaan dugsiyada, BPS waxay ogolaadeen inay sii wadaan ugu yaraan shaqaaleysiinta fasalka ka mid noqoshada ee hadda jira iyo saamiga tirada fasalka (taas oo laga yaabo inay ku jirto 2018-2021 CBA, 2018 ka mid noqoshada, ama heshiis kale ama habdhaqan hore ee dugsiyada) ilaa wakhtigaas naqshadaha cusub ee loo dhan yahay ayaa la hirgeliyay.

Malaha wax heshiiskan ka mid ah oo saamayn doona qaabka ku darida dugsiga Henderson ilaa iyo inta laga gaadhayo wakhtiga ay dhinacyadu ku heshiiyaan oo ay ka hirgeliyaan naqshad cusub oo loo dhan yahay dugsigaas.

Talada Macalinka

- **Kulanada IEP**
  - Dhammaan go'aamada ku saabsan barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) waxaa lagu go'aamin doonaa habka kooxda si waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka. Dhamaan xubnaha qeybaha gorgortanka macalimiinta ee taageera ardayga naafada ah waxaa lagu martiqaadi doonaa inay ka soo qaybgalaan shirarka kooxda. Baaxada la heli karo, degmadu waxay siin doontaa daaboolista macalimiinta fasalka ka qaybgala shirarka kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP).

  - **Kooxaha Qorshaynta U dhanaanshaha**

Dhammaan dugsiyada waxaa looga baahan yahay inay yeeshaan Kooxda Qorsheynta U dhanaanshaha taasoo la shaqeyn doonta kooxda Hogaaminta waxbarashada. Sanadka koobaad waxaa la samyn doonaa qorshaynta iyo hirgelinta bilowga ah. Sanadka labaad iyo midka sadexaad waxay noqon doonaan inay taageeraan hirgelinta. Gunaanadka Sannad-dugsiyeedka 2024-2025 ama gabagabada sannadkooda qorshaynta iyo labada sano ee fulinta, mas'uuliyadda u dhanaanshaha kooxda qorsheynta ayaa laga yaabaa inay u wareegto si loogu daro taageerada joogtada ah si loo dhiso bulsho loo wada dhan yahay.

  - Xubnaha BTU ee loo xushay Kooxda Qorsheynta U dhanaanshaha waxay heli doonan ilaa laba maalmood oo buuxda oo ah caymiska beddelka ah ee Kooxda si ay u sameeyaan socod-socod, indho-indhayn fasalka, la kulmaan, qorsheeyaan oo ay wax ka qabtaan walaacyada.
  - Xubnaha BTU ee loo xushay Kooxda Qorsheynta U Dhanaanshah waxay isticmaali karaan ilaa shan (5) saacadood si ay wax uga qabtaan tabashooyinka kooxda loo keeno. Hogaamiyaha dugsiga ayaa go'aamin doona saacadaha horumarinta xirfadlayaasha ee qandaraaska ah, oo aan ka badnayn shan (5) saacadood wadar ahaan, laguna badali karo shaqada Kooxda Qorshaynta U dhanaanshaha.
  - Xubnaha BTU ee kooxaha qorshaynta u Dhanaanshaha goobaha dugsiga waa in ay doortaan xubnaha BTU ee dugsiga ee u qalma. Xubnaha BTU ee ku jira kooxda qorsheynta U Dhanaanshaha waa in lagu magdhabaa qiimaha qandaraaska saacadiiba kulanada dheeraadka ah ee ka baxsan maalintooda shaqada iyo sanad dugsiyeedka ilaa 15 sanad dugsiyeedkiiba. Halka uu dugsigu leeyahay jago maalin buuxda aha ama maalin barkeedah oo loo qoondeeyay inuu hogaamiyo dhaqamada loo dhan yahay (macalin, isuduwaha, iwm.), qofkaasi waa inuu fududeeyaa kooxda. Ugu yaraan 50% gudiga waa inay noqdaan xubnaha BTU.
  - Kooxda qorsheynta u dhanaanshaha waxay masuul ka noqon doonaa inay soo jeediyaan talooyinka Golaha Dugsiga ama Guddiga Maamulka arrimaha soo socda:
    - Qorshaynta ito Fulinta, oo ay kamid yihiin:
      - Horumarinta Xirfadeed
      - Dhisida dhaqanka iyo go'aanka maskexeed
      - Jadwaleynta
      - Shaqaalaha
      - Qaab-dhismeedka xiriirka isgaarsiin ahaaneed, xiriirka iyo habraaca nidaamka SST/MTSS ee ku saleysan dugsiga

- Dib u eegis ku samaynta ardayda fasalka ka kooban yahay iyo hababka shaqaaleysiinta ee Dugsiga
- Kooxda Qorshaynta U Dhanaanshaha ayaa laga yaabaa inay xushaan wakiil si uu uga qaybqaato qaybaha kulanka ee aan xiriiin go'aamada shaqaalaha shakhsi ahaaneed.
- Soo gudbinta talooyinka la soo jeediyay ee kulanka sannadlaha ah ee u dhexeeya kooxda dugsiga iyo kooxda xafiiska degmada si ay dib ugu eegaan shaqaaleysiinta sannad dugsiyeedka soo socda.

○ Kooxda Qorshaynta U dhanaanshaha ILT iyo/ama ayaa bixin doona joogtaynta/qiimaynta dhaqamada loo dhan yahay:

- Qiimaynta guulaha iyo caqabadaha
- Ka codsashada iyo tixgelinta codadka iyo khibradaha daneeyayaasha
- Latalinta hogaanka dugsiga ee daldalooda iyo baahiyaha xaga shaqaalaynta iyo kheyraad kale

- **Taageerada Kooxaha Qorsheynta:**

○ Degmadu waa inay samaysaa oo ay joogtaysaa nidaamka buug-gacmeedka, borotokoola, iyo habraaca, oo ay ku jiraan hagidda waxyaabaha uu ka kooban yahay fasalka iyo shaqaaleysiinta habboon, iyo sidoo kale fursadaha tababar ee lagu taageerayo kooxaha qorsheynta ka mid noqoshada dugsiga.

Taageerada Tacliinta

- **Balan-qaadka**

○ Degmadu waxaa balan qaaday inay hubiso inay dhammaan ardaydu helaan taageerada tacliimeed ee loo baahan yahay ee qaabka MTSS.

○ Degmadu waa inay joogtaysaa oo ay daabacdaa liiska MTSS ee taageerada oo la cusboonaysiiyo ugu badnaan sannad.

- **Taageerooyinka Diwaanka Macalinka Fasalka**

Diwaanka Fasalka - Diiwaanka macalinka ee ujeedeeda tahay luqadda hoos ku xusan waxaa lagu qeexaa inuu yahay macallinka fasalka ee loo xilsaaray ardayga qayb kasta oo maalinta ah. Dugsiga hoose, tani inta badan waa macalinka guriga ku bara waxbarashada guud. Dugsiga sare, tani waxay inta badan loola jeeda maaddooyinka macalinka arday kasta waqtigiisa. Tani waxay sidoo kale loola jeeda macalimiinta dugsiga hoose ee labada luqadood bara iyo fasallada SEI. Luqadda qaybtan loolama jeedo diiwaanka macalimiinta kuwaas oo kala shaqaynaya ardayda fasalo aad u kala duwan ama macalimiinta diiwaanka dugsiyada maalintii.

Diiwaanka macalinka, isagoo la shaqaynaya macalimiinta kale iyo adeeg bixiyeyaasha, ayaa mas'uul ka ah dhammaan natiijooyinka ardayda fasalkooda. Ardayda ku jirta barnaamijka waxbarashada gaarka (IEP), diiwaanka macalinka ayaa bixin doona tilmaamaha ku habboon qaab-dhismeedka manhajka muhiimka ah ee dhammaan ardayda.

Diiwaanka macallinka ayaa mas'uul ka ah manhajka waxbarashada guud iyo bixinta hoy. Diiwaangashan macalinka wuxuu la shaqayn doonaa macalimiinta waxbarashada gaarka ah ama adeeg bixiyeyaasha la xiriira si loo hubiyo in shuruudaha barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ardayda buuxiyeen, sida wax ka beddelida manhajka, taageerada dabeecadda iyo tilmaamaha tooska ah ee ay la socdaan adeegyada la xiriira.

Fasallada waxaa laga shaqaalaysiin doonaa shaqaale si ay u buuxiyaan shuruudaha barnaamijka wqxbarashada gaarka ah (IEP) ee ardayda. Dhinacyadu waxay garwaaqsadeen in ruqsad bixinta labo/saddex mar ah aan loo tixgalin doonin qaab adeeg bixineed oo keliya iyo in hababka ay ku jiraan ugu yaraan laba barayaasha la tixgeliyo marka hore si ay u buuxiyaan shuruudaha barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ardayda ee deegan aad u xadidan. Dhinacyadu waxay garwaaqsadeen in macalinka haysta ruqsada labaad ee waxbarashada gaarka ah ama ESL inaasan laga dhaafin waajibaadka Degmadda ee ah inay bixyso taageerada macalimiinta kale ee looga baahan yahay barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ardayda iyo/ama dheefaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada ESL. Macalimiintu waxay u hoggaansami doonaan xeerarka gobolka iyo kuwa federaalka ee ku saabsan macluumaadka ardayda ee qarsoodiga ah ee kordhinaya walaacyada ururkooda. Haddii midawga ka hir imaano in adeegyada muhiimka ah aan loo bixin sidii ay ardayda barnaamijka waxbrashada gaarka ah (IEP) uga baahnaayeen, markaas ururku waxa laga yaabaa inuu walaaciisa kor u qaado kooxda Qorshaynta U dhanaanshaha. Haddii midawga kahor imaano doono in walaacyada aysan si wanaagsan u xallin Kooxda Qorsheynta U Dhanaanshaha, midawga waxa uu sii kordhin karaa walaaca uu ka qabo Kooxda Hawl-wadeenada ah ee U dhanaanshaha kuwaas oo mawqifkoodu noqon doono kama dambays, qoraal iyo dhaqangelin waa haddii ay waafaqsan tahay shuruudaha gobolka iyo federaalka sharciyada iyo xeerarka khuseeya waxbarashada gaarka ah iyo ardayda barta luqadda Ingiriisiga. Kooxda U Dhanaanshaha ee Hawl-wadeenada ee Guddiga Dugsiga waxay kulmi doonaan ugu yaraan 10 mar inta lagu jiro sannad dugsiyeedka si ay dib ugu eegaan walaacyadan oo ay jawaab ugau helaan kulanka soo socda. Kooxda Qorshaynta U Dhanaanshaha iyo Kooxda hawl-wadeenada ee U Dhanaanshah waa in aanay heli karin macluumaadka ardayga ee qarsoodiga ah.

Wakhtiga qorshaynta caadiga ah ee wadatashiga iyo si wadajir ah wax u barida waa muhiim. PD ga socda sidoo kale waa muhiim.

BPS waxa laga yaabaa inay sameeyaan jagooyin dugsi ahaaneed ama jagooyin heer dhexe ah sida tababaraha, khabiirka, maamulayaasha, agaasime ama agaasimaha guud oo ku foogan taageeridda iyo hirgelinta u dhanaanshaha iyo dhisidda habka MTSS ee hal dugsi ama ka badan. Marka muhiimka tahay, kuwani waxa laga yaabaa inay xubno ka yihiin qaybta wada-hadalka macalimiinta BTU oo leh mushahar iyo shuruudo shaqo oo u dhigma tababaraha waxbarida. Qofkani waxa uu fududayn karaa kooxda qorshaynta u dhanaanshaha dugsiga.

- Meesha ay jirto heer isku dhafan, mas'uuliyadaha hoggaaminta aan ahayn waa in lagu kharash gareeyaa adeegga tooska ah ee ardayda haddii aysan ahayn jagada BTU.
- Haddii aan loo tixgalinin xeerarka kale ee qandaraaskan ka soo horjeeda qofka jagadan haya, uma shaqeyn doono sidii qiimee BTU xubnaheeda

- BPS waxay balan qaaday inay bixiso macalimiinta si ay u bixiyaan hawlaha tacliimeed (tusaale, agabka macalimiinta, macalimiin ESL, Wax ka qabashada heerka 2, iwm.) si waafaqsan baahida ardayda dugsigooda
  - Macalimiintan ayaa mas'uul ka noqon doona bixinta adeegyada tacliimeed ee habka MTSS waxayna si toos ah ugu adeegi doonaan adeegyada ardayda si waafaqsan talooyinka kooxda SST iyo barnaamijka waxbrashada gaarka ah IEP. (Ka eeg qoraalka qondaynta hoos)

■ Degmadu waxay abuuri doontaa oo joogtayn doontaa lambarka taleefoonka ee loogu talagalay Waxbarashada Gaarka ah kaas oo siin doona fursad si qarsoodi ah looga soo wargaliyo walaacyada waxbarashada gaarka ah iyo/ama xadgudubyada.

- Macalinka fasalka ee leh 1.0 oo hadana isticmaalayo sadex ruqsadood, oo laba ka mid ah ay yihiin waxbarashada gaarka ah iyo ESL, adeegyada ESL ee ardayda EL waxaa bixin doona macalin ESL ah oo aan ahayn macalinka diiwaanka ku jira, ama Adeegyada waxbarashada Gaarka ah waxaa bixin doona by macalinka ed gaarka ah oo aan ahayn macalinka diiwaanka, ilaa macalinku ogolaado oo la siiyo lacag dhan 45 daqiiqo maalintii oo ah qiimaha saacadaha qandaraaska.

- Marka arday ka gudbaysa barnaamijka waxbrashada gaarka IEP Dugsiyada Dadweynaha Boston dugsi hoose oo u gudbayo dugsi dhexe ama dugsi dhexe oo u gudbayo dugsiga sare, dugsiga qaabilya wuxuu siin doonaa qof si uu ula kulmo kooxda dugsiga diraysa marka ay diyaarinayaan barnaamijka waxbrashada gaarka IEP.

Tababarista Shaqaalaha

- Dhammaan shaqaaluhu waa inay ka qaybqaataan horumarinta xirfadeed si degmada dhamaan ula jaanqaado fahamka guud oo ku saabsan sida aan u habaynayno adeegyada waxbarashada gaarka ah. Tan waa inay ahaadaan tababaro shakhsi ahaaneed oo loogu talagalay Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah, laakiin sidoo kale waxaa ku jira dhamaan shaqaalaha, hoggaamiyeyaasha dugsiga, adeegga bixiyeyaasha xiriirka la leh, khabiirka cilmu-nafsiga dugsiga iyo macalimiinta waxbarashada gaarka ah iyo kuwa guud ahaaneedba.
- Dugsiyada waxa lagu dhiirigelinayaa inay isticmaalaan wakhtiga dheeraadka ah ee lagu qeexay Qodobka V E. 1. (a) 11. ujeedooyinka horumarinta xirfadeed awgood ee u dhanaanshaha la xariira. 10ka saacadood ee lagu qeexay Qodobka V E .1. (a) 11. waxaa lagu samayn karaa muddo kordhin ah 12 saacadood ujeedada ay tahay tababarka ka u dhanaanshaha (oo la mid ah tababarka DOJ ESL). Sanad qorshaynta iyo sannadka koobaad ee loogu talagalay fulinta oo keliya, wakhtigan waxaa qorshayn kara maamulaha, ama madaxa dugsiga - laakiin wakhtigaas waa inuu la raaca maalinta shaqada ama sannad-dugsiyeedka, saacadaha waxa loo qaban karaa shakshsi ahaan ama si toos ah go'aanka hogaamiyaha dugsiga. Sannad dugsiyeedka 2022-2023, wakhtigan waxa la qorsheeyay bilowga sannad dugsiyeedka, jadwalkuna waa in ay ansixiyaan inta badan ee macalimiinta ay saamayta ku yeesheen. Sannad dugsiyeedka 2023-2024, wakhtiga waxaa la qorsheeyay dhammaadka sannad dugsiyeedka 2022-2023 waxaana lagu ogolaan doonaa cod aqlabiyad ah oo ay sameeyan maclimiinta Haddii maamulaha iyo waaxda ku heshiin waayaan samaynta jadwalka horumarinta xirfadda, laba iyo tobanka saacadood ayaa lagu dari doonaa dhamaadka sannad dugsiyeedka. Si kastaba hanoqotee heerka macalinka wuu ka hooseeyo heerka qandaraaska saacadii, macalinka waa in lagu bixiyaa qiimaha saacadii qandaraaska saacadahan.

Xirfadlayda ah waa in lagu casuumaa inay ka qaybgalaan samaynta xirfada waxayna laga yaabaa inay si mutadhawacnimo ah ay u sameeyaan waxaana loogu magdhabi dooba heerkooda caadiga ah.

Waqtiga Qorshaynta

- Waxaan la soconaa in qorsheynta iyo diyaarinta macalinku ay lama huraan tahay. Mar kasta oo ay suurtogal tahay, waxaanu ka shaqayn doonaa inaanu xaqiijino in macalimiinta diwaanka ku jira iyo macalimiinta sida lagu qeexay Qodobka I H. ay u helaan wakhti ay ku qorsheeyaan casharka si wada jir ah, oo ay ku jiraan hormarinta iyo wax ka badalitaanka si loo hubiyo in ardaydu si buuxda u qaataan casharada manhajka.

- Dugsiyada dhexe iyo kuwa sare, macalimiinta si mutadhawacnimo ah u noqday macalimiin isku xira ayaa xog iyo talo ka ururin doona macalimiinta kale ee waxbarashada caadiga ah oo kulaankaasna keeni doona. Waxay adeegsan karaan laba ka mid ah waqtigooda maamulitaan si ay u qabtaan hawshan.
- Haddii uu ogolyahay jadwalka dugsiga, macalimiinta buuxiya shuruudaha barnaamijka waxbrashada gaarka ah ee ardayga IEP, ee ku jira waxbarashada guud ama ruqsada ESL iyo ruqsada waxbarashada gaarka ah labadaba waxaa la siin doonaa 48 daqiiqo oo dheeri ah todobaadkii si loogu sameeyo waraaqaha waxbarashada gaarka ah, intaa waxaa sii dheer qandaraaska horay usii jiray ee P&D iyo waqtiga CPT. Haddii waqti aan loo helin, macalinka waxa la siin karaa magdhow ilaa 48 daqiiqo todobaadkii.

Qoraalka Qoondaynta ee Ku Saabsan Qoondaynta Wax ka Qabashada Waxbarashada

- Wax ka qabashadan cusub ee tacliimeed (tusaale, agabka macalinka, macalinka ES, tababare, khabiir takhasus leh, maamule, agaasime ama iskuduwaha, iwm. oo ku foogan taageerida iyo hirgelinta u dhanaanshaha iyo dhisida qaab-dhismeedka MTSS) marka la bilaabo, waxaa loo qoondayn doonaa dugsiyada habraac lagu salaynayo tirada ardayda ku jirta barnaamijyada waxbarashada gaarka ah IEP, tirada ardayda Luqadda Ingiriisiga iyo Tusmada Fursadaha. Inta waxaa sii dheer, dhibcaha akhriska iyo baaxada adeega barnaamijyada waxbarashada gaarka ah IEP ayaa la tixgalin doona. Dhinacyadu waxay garwaaqsadeen in ruqsad bixinta labo/saddex mar ah aan loo tixgalin doonin qaab adeeg bixineed oo keliya iyo in hababka ay ku jiraan ugu yaraan laba barayaasha la tixgeliyo marka hore si ay u buuxiyaan shuruudaha barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ardayda ee deegan aad u xadidan ADEEGYADA ESL.

Xiriiriyaha Waxbarashada Loo Dhan yahay

Sanad dugsiyeedka 2022-2023 ilaa 2026-2027, dhinacyadu waxay maalgelin doonaan xiriiriyaha waxbarashada loo dhan yahay. Doorka xiriiriyuhu waxaa uu ka ciyaari doonaa door muhiim ah hirgelinta himiladeena la wadaago ee ah degmo loo wada dhan yahay. Sharaxaada gaarka ah ee shaqada waxaa si wadajir ah ugu heshiinaya dhinacyada, laakiin waajibaadka waxaa ka mid noqon doona:

- Horumarinta iskaashiga shaqada maamulka iyo taageerada himilada,
- Ka taageerida xubnaha BTU xalinta caqabadaha, su'aalaha, ama walwalka la xiriira waxbarashada loo wada dhan yahay iyo bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada ESL.
- U shaqaynta gudiyada BPS ama shaqada kooxaha la xiriira yoolka sida ugu habboon.
- Qoraalka warbixinnada horumarka billaha ah ee lasoo jeediyo Kormeerayaasha guud kuwaas oo muujinaya goobaha xoogga leh iyo hormarinta u baahan ee la xiriira fulinta,
- Wargalinta walaacyada macalinka iyo fikrad celinta kooxda hawl-wadeenada ah
- Ka qaybgal kulanada guddiga dugsiga hadba sida loogu baahdo si aad uga jawaabto su'aalaha

Xiriiriyaha Waxbarashada Loo Dhanyahay waxa uu ahaan doonaa jago ay matalayso BTU waxana la siin doonaa boos shaqo oo ku filan xafiiska dhexe ee BPS si ay u taageeraan wada shaqaynta Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah ee BPS. Xiriiriyaha waa inay soo xushaan BTU iyo wakiilka Xafiiska Tacliinta, haddii Kormeeraha Guud ansixiyo xulashada. Xiriiriyuhu waa inuu soo wargaliyaa Madaxweynaha BTU iyo Kormeeraha guud ama wakiilkooda. Dhinacyadu waxay mas'uul ka yihiin bixinta 50% ee mushaharka maamulahaas oo mushaharkiisa noqon doona Kooxda 1 iyo 10%. Kormeeraha guud waa inuu magacaabayaa shaqsi si uu u qiimeeyo Xiriiriyaha.

Kooxda Ka Shaqaynta U dhanaanshaha

Guddiga Dugsigu waxa uu samayn doonaa koox shaqaale oo ka shaqeeya u wada dhanaanshaha si ay u kormeeraan horumarka una hirgeliyaan waxbarashada loo wada dhan yahay ee degmada. BTU waxay

heli doontaa ugu yaraan 50% ruqsada kooxda shaqada si loo hubiyo in doorarka badan ee macalimiinta BTU ay matalaan (tusaale, macalinka waxbarashada gaarka ah, xirfadlayaasha, kala duwanaanshaha heerarka fasalada, adeeg bixiyayaasha la xiriira, COSE). Madaxweynaha BTU ayaa magacaabi doona BTU ruqsadaha waxaana go'aan laga gaari doona codka aqlabiyadda ee Kooxda U Dhanaanshaha Shaqada. Haddii ay ku xiran cod bixin, guddoomiyaha guddiga dugsiga ayaa noqon doona mid sameeya cod bixinta. Cod bixinta ayaa lagu dhawaaqi doonaa kahor kulanka, dhammaan xubnahana waa in ay goobjoog ahaadaan si ay codeeyaan. Si kastaba ha ahaatee, guddoomiyaha guddiga dugsigu wuxuu xaq u leeyahay inuu oggolaado qoondaynta beddelka ah.

Cabirka fasalka:

Wax ka badel Qodobka V A. 1. (a) (p. 25) adigoo ku bedelaya kuwan soo socda:

> (a) Guddiga iyo Midawga waxay garwaaqsadeen rabitaanka gaaritaanka xaaladaha waxbarasho ee ugu wanaagsan iyagoo hubinaya baaxada fasalka la shaqayn karo. Si taas loo gaaro Gudigu wuxuu garwaaqsaday inay haboon tahay in la isku dayo in la gaaro tirada fasalka ee soo socda:
>
> - 12 arday oo ku jira fasallada tababarka oo ah arday fasal gaar ah
>
> Si loo gaaro bartilmaameedyada tirada ardayda fasalka, Guddiga iyo Midawga ayaa ku heshiiyey in tirada ardayda fasalka ee soo socda uu dhaqan galiyo:
> – 20 arday fasalka tababarashada
> – 35 arday oo dhigta waxbarashada jir-dhiska ee dugsiyada dhexe iyo sare
> - 20 arday oo dhigta fasallada Ingiriiska (SEI), Fasallada Labada Luuqadood, iyo fasallada ESL.
